

## Ku saabsan CRAFT

AHA waxaa ay ku shaqeysaa dariiq ama ama nidaam la yiraa CRAFT, waa nidaam lagu xiriiro oo ku wajahan dadka qaraabada la ah dad maandooriye ama aalkolada isticmaala. Nidaamkani xiriirka ahi waa mid xoojinaaya qaraabada waxaana taasi marar badan keentaa in qofka maandooriyaha isticmaalaa doorto qaab nololeed kale. AHA waxaa ay higsaneysaa in wadahadal qofka keligiis ah iyo wadahadal kooxeedba la dhiso hab-dhaqan wadahadal oo ku dhisan nidaamka CRAFT. Nidaamkan ama dariiqadani waxaa ay ugu horeyn horseedaa in la xoojiyo qaraabada iyadoo la raacayo qaab caddeyn ku dhisan kaasoo dhamaystira adeega degmada Örbro ee ku wajahan caawinaada guud ee loo fidiyo qaraabada. CRAFT waxaa ay qaraabada bartaa in jawiga la bedelo oo markaas uu isbedelo qaab dhismeedka xiriirka.

Qaraabodu waxaa ay bartaan qaab diyaargarow ah kaasoo uu qofku ku bedelaayo qaabka uu u nool yahay si noloshiisu tayo u yeelato, taasoo aan ku xirnayn haddii qofka maandooriyaha isticmaalaa isbedelo iyo hadii kaleba. CRAFT waxaa ay qaraabada bartaa iney yareeyaan/dhaafaan dhaqanka keeni kara in qofka qaarabada ahi sii wato isticmaalka maandooriyaha.

**AHA**  
Anhöriga Hjälper Anhöriga



070 – 677 68 85



ahaorebrolan@gmail.com



[www.aha-forening.org](http://www.aha-forening.org)



ku raadi AHA Örebro

**AHA**  
Anhöriga Hjälper Anhöriga

**Miyaad ka  
welwelsan  
tahay qof  
kuu dhow?**

# Warbixinta AHA ee gobolka Örebro

AHA waa jaaliyad ku kaalmayneysa adiga, haddii uu jiro qof kuu dhow oo isticmaala maandooriye sida aalkolada ama daroogada.

AHA kuma xirna wax siyaasad ah ama arrimo diin ah, waa urur iskaa wax u qabso ah ka shaqeeya in qaraabado iscaaawinaan. Wuxaan ka duulnaa khibradayada, u wacnaadaan. Wuxaan ku shaqeynaa aalado ku dhisan cilmi baaris si qaraabodu u wacnaadaan. Jaaliyadu kama hadasho waxii ay ogtahay.

Wuxaan la shaqeynaa meelo badan ee gobolka Örebro ah, tusaale ahaan xarunta lagu caawino dadka maandooriya isticmaala, degmada hay`da arrimaha bulshada iyo booliska.  
Si guud oo wadajirka ah ayaa looga shaqeeyaa dadka qabatima maandooriyayaasha.



## Waxaan idinku casumeynaa

- Talefoon degdeg
- ahTalobxin taleefonka
- ahTalobxin shakhsii ah
- Kooxo is caawina
- CRAFT-Talo bixin ku dayasho leh  
(fiiri; [www.craftsverige.com](http://www.craftsverige.com))
- CRAFT-kulan waxbarasho oo kudayasho leh



## Qiimuhu waa imisa?

Si aad adeegayaga qayb uga hesho waa inaad ururka xubin ka tahay.

Lacagta xubinimada waa 200 kr sanadkiiba, kolkaas ayaa qofku adaagayaga qayb ka heli karaa.

Waxaa noqon karaa taageere, waana 100 kr sanadkii. Waa dadka aan si toos ah kaalmo nooga baahnayn balse iyagu kaalmo siinaaya howlaha aan qabano.



## Sidee lagu bxinayaa lacagta ?

Ku bixi 200 kr oo xubinimo ah ama 100 kr oo taageero ah, ku bixi koontadan plusgiro 17 31 89-2 ama swish ahaan ugu soo tuur lambarkaan 123 419 84 12, ku qor kharashii xubinimada .



## Xagee joognaa?

Kulamadayadu waxaa ay ka dhacaan meel aan la ogeyn oo ku dhextaal örebro  
Ciwaanka waa Drottninggatan 11.

